

DOWLADDA SOOMAALIYA

XEER Maamul 23 jannaayo 1960, n. 25 rep.

Samaynta Machadka Farsamada iyo cabbiraadda.

Wasaaradda Waxbarashada Wasiirku

Marku uu arkay sharciga 7 maajo 1956, n. 1, lana xiriirta "Dhismaha Dowlad Soomaaliyeed";

Marku uu arkay wareegtada Maamulka ee 18 maajo 1956, no. 78, oo la xiriirta "Curinta Dowladda Soomaaliya";

Marki uu arkay Wareegto Maamulka ee 24 Juun 1959, n. 43 oo wax laga badalayo qodobka. 1 ee wareegtada la soo sheegay n.78 asaasayana Wasaaradda Waxbarashada;

Marki uu arkay Xeerka n. 10 ee abriil 6, 1954, kaas oo oggolaanaya Xeerarka Guud ee dugsiyada sare ee Soomaaliya ";

Marki uu gartay baahida loo qabo in la aburo Machad Farsamo iyo cabbiraad; Dhageeystana Golaha Sare ee Dugsiyada;

WUXUU XEEREEYAY:

Qod. 1

Waxaa la sameeyay Machadka Farsamada iyo cabbiraadda (sahminta).

Qod. 2

Machadka Farsamada ee sahamiyeyaasha ayaa lagu gelayaa shahaaddada dugsiiga Hoose/Dhexe.

Qod. 3

Wareegtooyin xiga ayaa lagu soo saari doonaa shuruucda Hey'adda, barnaamijka wax baridda iyo kuwa kale oo dhameystir iyo buuxin ah kuna saabsan Machadka Farsamada iyo cabbiraadda ee kor lagu xusan.

Qod. 4

Amarkan wuxuu dhaqan galayaa dhammaan ujeedooyinka laga bilaabo 1da luulyo 1959.

Muqdisho, 23ka jannayo 1960.

Wasiirka

Maxamuud Yuusuf Aadan Muro

Arkay diiwaangelinta n. 21, warqad n. 149.

Muqdisho, 12 abriil 1960.

Garsooraha xisaabaadka: **Spadaro.**